



**VALG**

Macluumaad muhiim ah oo loogu talo galay dadka doonayo in ay codeeyaan

## **Doorashada Baarlamaanka iyo Doorashada Golaha Sami ee 2009**



Maalinta doorashadu waa 14 Sibteembar 2009.

Qofka aad tahay waa in la caddeeyaa ka hor inta aadan codeyn.



KOMMUNAL- OG REGIONALDEPARTEMENTET

# Doorashada Baarlamaanka iyo Doorashada Golaha Sami ee 2009

**Storting**, ama Baarlamaanku, waa golaha qaranka Norway ee sida dimoqraadiga ah lagu soo doorto. 169 xunbood ayaa xafiiska loo doortaa afartii sano mar. Waajibaadkoodu waxaa weeye in ay metelaan shacabka 19 deegaan oo la iska soo doorto, kuwaas oo u dhigmo 19ka degmo ee Norway ka kooban tahay. Howlaha ugu muhiimsan ee uu Baarlamaanku qabto waxaa weeye in ay ansaxiyaan sharcayo, dejiyaan miisaaniyadda waddanka iyo in ay fuliyaan howlaha dowladda.

**Sameting**, ama Golaha Sami, waa gole si dimoqraadi ah loo soo doorto oo madax bannaan oo afhayeen metalaya u ah dadka ka soo jeeda Sami ee Norway. 39 xubnood ayaa loo doortaa xafiiska muddo afar sano ah. Waajibaadkoodu waxaa weeye in ay metelaan dadka Sami ee Norway oo dhan. Golaha Sami wuxuu ku maamulaa miisaaniyaddiisa nidaamka ay dowladda dhexe u dejisay. Golaha Sami wuxuu leeyahay awood-sharchiyeed loogu talo galay degaanada hoos yimaada.

Isticmaal xuquuqdaada codeynta oo go'aanso qofkii ku meteli lahaa Baarlamaanka iyo Golaha Sami afarta sanno ee soo socoto. **Isticmaal codkaaga!**

Buuggan yar waxaa ku qoran macluumaad la taaban karo oo loogu talo galay dadka doonayo in ay codeeyaa.

## Maalinta doorashadu waa Isniin 14ka Sibteembar 2009.


Dawladda hoosaadyada qaar badan ayaa ogol in codka la dhiibto maalinta Axadda 13ka Sibteembar.

**Qofka aad tahay waa inaad caddeysaa ka hor inta aan la codeyn!** Sharciga Doorashadu wuxuu qabaa in qofka wax dooranayo haddaanu sarkaalka doorashada garaneyn in uu keeno wax aqoonsi ah. Aqoonsigu waxa uu noqon karaa baasaboor aan dhacsaneyn, shati baabuur ama kaarka bangiga oo uu sawir ku dheggan yahay, in kasta oo ay warqad aqoonsi oo kale laga yaabo in ay kuu shaqeyso. Warqadda caddeynta ee la keenayo waa in uu ku qornaadaa qofka codka bixinaya magaciisa, taariikhda dhalashada iyo inuu sawir ku dhegan yahay.

Cod bixiyayaasha ku dhex sugar hay'ad sida guri daryeel ama cusbitaal, ama xabsi ku jira, waxaa caddeyntooda hubin kara xubin ka mid ah shaqaalaha hay'adda.

**Dhammaan codeeyayaasha diiwaanka gashan waxay heli doonaan kaarka doorashada.** Kaarka doorashada waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan goobta iyo sida loo codeynayo maalinta doorashada. Kaarka codeynta qasab ma aha inaad wadato si aad codkaaga u dhiibato, laakiin haddii aad heysato wuxuu kuu badbaadinaya waqtiga. Kaarka doorashada looma aqbalayo caddeyn garasho ahaan.

Cod bixiyayaasha xaqa u leh in ay u codeeyaa doorashada Baarlamaanka iyo doorashada Golaha Sami labadaba waxay heli doonaan labo kaar oo kuwa codeynta ah.



# Doorashada Baarlamaanka

## ► Qofkee codeyn kara?

Muwaadiniinta u dhashay Norway oo ay da'doodu ka weyn tahay 18 sano, ama 18 noqonaya sanadka doorashada, ayaa xaq u leh in ay coddeeyaan Doorashada Baarlamaanka. Codeey-ayaashu waa in ay yihiin, ama ahaayeen, kuwo ku diiwaan gashan iney degan yihiin Norway.

## ► Sidee iyo halkee baad ka codeyn kartaa?

### **Maalinta doorashada**

Waa in aad codkaaga ka dhiibataa goobaha dowladda hoose ee aad ka diiwaan gashan tahay degaan ahaan. Tani waa goobta dowladda hoose ee uu codeeyuhu uga diiwaan gashan yahay inuu degan yahay degaan ahaan Diiwaanka Dadka Norway taariikhdu markey tahay 30ka Juun 2009. Waxaad codkaaga ka dhiiban kartaa goob kasta oo codbixin ee nawaaxiga dowladda hoose. Tusaalooyinka ku qoran bogga soo socdo waxay muujinayaan sida loo buuxiyo warqadda codbixinta maalinta doorashada.

### **Codadka la hormariyo**

Waxaa codka laga dhiiban karaa goob dowlad hoose kasta ilaa iyo Jimcaha 11ka Sibteembar 2009. Qaabka loo dhiibanayo codadka la hormariyo way ka duwan yihiin qaabka loo dhiibanayo codadka maalinta doorashada.


Qaabka loo dhiibanayo codadka la hormariyo waa sida soo socoto:

- 1) Waa in aad qof ahaan u hor istaagtaa sarkaalka doorashada, kaas oo ku siin doono baqshadda warqadda codeynta kuna tusayo sanduuqa codeynta ama qol xasiloon.
- 2) Qaado warqadda doorashada ee saxda ah ka dibna calaamadi wixii isbedel ah ee aad dooneyso in aad sameyso.
- 3) Haddii aad codkaaga ka dhiibaneyso degmo ka duwan tan aad ka diiwan gashan tahay degaan ahaan, waxaa lagu siin doonaa warqadda codeynta oo gaar ah oo la socoto baqshadda warqadda codeynta. Warqadda codeynta waxaa ku taxan magacyadaa ururada siyaasadda ee diiwaan gashan oo aan laheyn magacyada musharixiinta. Ku calaamadi 'X' ama ku qor magaca xisbiga/kooxda aad dooneyso in aad u codeyso. Waxaa kale oo aad warqadda codeynta ka heli kartaa degma-daada haddii aad dooneyso in aad sameyso wax isbedel ah.
- 4) Ku rid warqadda codeynta baqshadda warqadda codeynta.
- 5) U dhiib sarkaalka doorashada kaas oo adiga oo hortaagan, ku ridi doono baqshadda warqadda codeynta iyo kaarka codeynta baqshad weyn, xiri doono kuna ridi doono sanduuqa codeynta. Codkaaga waxaa loo gudbin doonaa nawaaxiga dowladdaada hoose si loogu daro tirinta codadka.


Haddii aad xanuunsan tahay ama aad curyaan tahay, waxaad ka codsan kartaa dowladda hoose ogolaansho ah in aad codkaaga ku dhiibato gurigaaga.

Dowladda hoose ayaa kuu sheegi doonto goorta iyo sida aad u codeyn doonto.


## ► Sida aad u codeyneso maalinta doorashada?




**1** Xulo warqadda doorashada saxda ah.



**2** Calaamadi wixii isbedel ah ee aad dooneyno in aad ku sameyso warqadda codeynta (ka eeg hab-raaca bogga soo socda).



**3** Isku laab warqadda codeynta oo ay magacyada xisbiyadu gudaha uga qoran yihiiin shaabadduna dusha uga taal – sidatan, qofna ma arki karo qofka aad u codeyneso. Warqadda codeynta waa in aan lagu ridin baqshada ama wax kale.



**4** U gee warqadda codeynta sarkaalka doorashada si dusha looga shaabadeeyo. Waraaqaha cadeynta ee shaabadeysan oo keliya ayaa shaqeynaya!




**5** Ku rid warqadda codeynta ee shaabadeysan sanduuqa codbixinta.

## ► Sidee baad ugu calaamadineysaa isbedelka warqadda codeyntra?

Adiga ayay ku khuseysaa haddii aad dooneysyo in aad calaamadda warqadda Codeyntra wax ka bedesho! Haddii aadan calaamadda wax isbedel ah codkaaga ku sameyn waxaa loo tirinayaan musharaxyda aad ku taxday warqadda doorashada sida ay u kala horeeyaan.

Sida loogu calaamadiyo isbedelka warqadda codeyntra:



**Kala bedelid sida ay u kala horeeyaan oo  
loo liisgareeyay musharxiinta**

Ku qorlambar (cusub) sanduuqa dhanka **bidiixda** ee magaca (yada) musharaxa (xiinta) si aad si cad ugu muujiso sida aad dooneysyo in aad u kala hormariso.



**Ka saaridda musharxiinta liistada**

Iskulalaab saar ama sanduuqa ka sax dhanka **midigta** ee magaca (yada) musharaxa (xiinta) ee aad dooneysyo in aad ka saarto liistada.

Ha ka laba labeyn in aad isbedel sameyso. Habka loo sameyeyo waxaa lagu sharaxay warqadda codeyntra. Codkaaga lama tuurayo, xitaa haddii aad khalad sameyso!

## ► Qofkee ku soo baxayaa doorashada?

Kuraasta baarlamaanka waxaa loogu qaybiyya xisbiyada iyo kooxaha heerarka degaanada iyadoo lagu saleynayo tirada codadka uu xisbi kasto helay.

Haddii in ka badan kala bar dadweynaha deegaanka ee u codeeyay xisbi ama koox ay isbedel ku calaamadiyaan isla musharaxa, tani waxay muujineysaa musharaxa loo doortay Baarlamaanka. Haddii kale musharxiinta waxaa loo doortaa habka ay ugu taxan yihiin warqadda codeyntra.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa [www.valg.no](http://www.valg.no)  
**Doorasho wanaagsan!**


# Doorashada Golaha Sami

Qof kasta oo xaq u leh in uu ka codeeyo doorashooinka golaha degaanka kana diiwaan gashan diiwaanka doorashada Sami ayaa xaq u leh in uu ka codeeyo doorashada Golaha Sami. Maalinta ugu danbeysa ee leyska diiwaan gelinayo diiwaanka doorashadu waa 30ka Juun 2009. Kuwa xaqa u leh in codeeyaan doorashooinka Baarlamaanka iyo Golaha Sami way ka dhiibban karaan codadkooda labadaba.

Kuwa ka diiwan gashan degaan ahaan nawaaxiga dowladda hoose halkas oo in ka yar 30 degaan ay xaq u leeyihii codeynta doorashada Golaha Sami ma awoodi doonaan in ay codkooda dhiibtaan maalinta doorashada. Taa bedelkeeda, xuquuqda codeynta waxaa loo heli karaa iyadoo la dhiibto codbixin la hormariyo. Golaha Sami bogga internetka ayay ku qoran yihiin nawaaxiyada dowladaha hoose ee ay arintani quseyso.

Doortayaasha waxaa laga yaabaa in ay xushaan in ay bedelaan qaabka ay mudanayaashu ugu taxan yihiin warqadda codeynta. Doortayaashu ma dooran karaan in ay tirtiraan musharixiinta.

Golaha Sami waxay u diraan macluumaad ku saabsan doorashada Golaha Sami qof kasta oo ku jiro diiwaanka doorashooinka Sami.



Wixii macluumaad dheeraada ah waxaa laga heli karaa [www.valg.no](http://www.valg.no) iyo [www.sametinget.no](http://www.sametinget.no) **Doorasho wanaagsan!**





Waxaa la daabacay Agoosto 2009 waxaa daabacay Wasaaradda Dowladda Hoose iyo Horumarinta Degaanka Daabacaddan waxaa lagu tarjumay sideed luuqadood, dhammaan waxaa laga heli karaa [www.valg.no](http://www.valg.no)

Lambarka daabacaddan: H-2229 Somali